

# Caymiska iyo Dheefaha

Hadii aad shaqada  
ku dhaawacantid waxaan  
halkan u  
joognaa inaan ku caawino!

**Hadii aad shaqada  
ku dhaawacantid waxaan  
halkan u  
joognaa inaan ku caawino.**

**wcb.mb.ca**

Daabcaadaan waxa loo bixiyaa macluumaad guud oo kaliya ahaan.  
*The Workers Compensation Act (Xeerka Magdhowga Shaqaalaha)*  
Manitoba iyo Shuruucda, iyo siyaasadaha WCB ayaa ah awoodda  
ugu danbaysa ee maareynta caymiska iyo xaq sheegashada.

# Caymiska iyo Dheefaha

Cidna ma filasho inay ku dhaawacanto shaqada, laakiin sida badan, dhaawacyada goobta shaqadu waa dhacaan. Nasiib wanaag, caymiska WCB ayaa kuu diyaar ah. Haddii aad ku dhaawacanto shaqada, ogow inaad leedahay caymiska aad u baahan tahay.

Loo-shaqeeyahaaga ayaa bixiya lacagta magdhawga shaqaalaha oo dhan si uu u hubiyo inaad caymis leedahay marka aad ku dhaawacanto shaqada. Loo-shaqeeyahaagu sidoo kale waa inuu bixiyo lacagta maalinta oo dhan ee maalinta aad ku dhaawacanto shaqada, maya ilaa wakhtiga dhaawacaaga.

Caymiska WCB wuxuu ku siiyaa qayb kamid ah mushaharkaaga wuxuuna bixiyaa kharashkaaga daryeelka caafimaadkaaga haddii aad ku dhaawacanto shaqada.



# Maxay WCB Caymisaad?

Hoos waxa ku yaala tusaalayaal qaar kamid ah dheefaha ay heli karaan shaqaalaha dhaawacma. Macluumaad gaar ah oo kusaabsan in lagu caymiyo wax kamid ah kuwa soo socda, la hadal qofka aad la xidhiidho WCB.

- **khasaaraha mushaharka**
- **daawaynta caafimaad iyo kharashka caafimaad**
- **daawaynta ilkeed**
- **daawaynaha duugista ama daawaynta jidheed ah**
- **adeegyada dhaqancalinta xirfadeed**
- **lacag buuran oo loogu talagalay naafowga abadiga ah**
- **hawlgabka**
- **dheefaha dhimashada**



# Khasaaraha Mushaharka

- WCB waxay bilawdaa bixinta mushaharka kaa khasaaray maalin shaqeedka xigta maalinta aad dhaawacantay.
- Waxaad heli 90% khasaarahaaga naqdiga ah ee mugga dakhliga. Xaaladaha qaar khasaarahaaga mushaharka waxa la xisaabin karaa 100% ee khasaarahaaga naqdiga ah ee mugga dakhliga ama 100% heerka dakhliga ugu yar ee WCB u yaala. Macluumaad dheeraad ah tixraac xaashida xaqiiqda Hagaha Dheefaha oo kujira [wcb.mb.ca](http://wcb.mb.ca).
- Waxaanu xisaabinaa 90% ama 100% naqdi ah (ama lacagta guriga u qaadashada) anaga oo qaadanaayna dakhligaaga kana jarayna ka jarisaha jiri kara, sida cashuurta dakhliga, CPP iyo EI. Ka jarista cashuurta dakhliga waxay kusalaysan yihiin xaaladda guurka iyo tirada ku-tiirsanayaasha. Dheefahaaga sidoo kale waxa saamayn kara arrimo kale sida wakhti dheeraad ah shaqaynta, gunnooyinka, dhimisaha shaqaalaha ee marmarka ama caadiga ah, iyo dakhliga ka yimaado meelo kale, oo ay kujirto gaar u shaqaysigu.
- Dheefaha WCB waa qaar bilaa cashuur ah; markaa, waxaanu sidoo kale ka goynaa xaddi la mid ah dheefaha cashuurta ay dhici karto inaad heli lahayd.
- Ugu dambayn, haddii aad leedahay qorshayaal kale oo caymis kuwaasi oo lacag ku siiyaa inta aad shaqada ka maqan tahay, wixii lacag aad hesho oo ka badan 100% ee khasaarahaaga naqdiga ah ee mugga dakhliga **waxa laga jari doona waxa** aad ka hesho WCB. Waa masuuliyaddaada inaad al socodsiiiso qofka aad la xidhiidho WCB caymiskan dheeraadka ah.

# Kharashyada Kale

Marka dhaawacanto, waxa dhici karta inaad u baahato inaad cusbitaal aado ama u baahado daawo lagu qoro.

Haddii kharashyadan ay si toos ah ugu xidhan yihiin dhaawaca goobtaada shaqada, waxa dhici karta inay bixiso WCB. Ka hubi qofka aad la xidhiidho WCB si aad u go'aamiso in kharashyada ay caymiso WCB.

## **Kharashyada daryeelka caafimaad ee la caymiyey waxa kujira:**

- kharashyada cusbitaalka
- daawada (oo ay kujirto daawada la qorayaa)
- daawaynta ilkeed
- addimaha macmalka ah, biraha ilkaha, tukubaha curyaanka, usha, caawiyaha maqalka iyo caawiyayaasha kale
- orthotics ama cag-gashiga
- kharashka beddelista ama dayactirka xubnaha macmalka ah, muraayadaha indhaha ama ilkaha macmalka ah halka uu dhaawac jiray
- kharashka beddelista ee dharka dhaawacmay dhaawaca goobta shaqada
- gunnada gaadiidka iyo maceeshadda haddii ay tahay inaad u socdaasho daawayn



# Iacagaha la Bixiyo Naafowga Abadiga ah

Waxa dhici karta in lagu siiyo lacag kuusan, marka laga tago lacagaha khasaaraha mushaharkaaga, haddii aad leedahay naafow abadi ah oo uu keenay dhaawaca goobta shaqadu.

Lacagtu waxay kusalaysan tahay khasaaraha shaqaynta ee uu keenay dhaawacaaga shaqadu.



# Adeegyada Jira ee kale WCB

## Adeegyada ku Laabashada Shaqada

WCB waxay kaala shaqayn xaqiijinta inaad hesho taageerada aad u baahan tahay si aad shaqada ugu laabato. Ku laabashada shaqadu waa hab la qorsheeyo oo ay ku lug leeyihiin adiga iyo bixiyahaaga daryeelka caafimaad, oo uu la jiro loo-shaqeeyahaagu, iyo xaaladaha qar, wakiilkaaga ururka shaqaaluhu. Goobtaada shaqadu waxa dhici karta inay lahayd barnaamijka ku laabashada shaqada.

## Adeegyada Dhaqancelinta Xirfadeed

Haddii aanad woodin inaad la shaqayso loo-shaqeeyaha halka aad ku dhaawacantay saamaynaha dhaawacaas dartood, waxa dhici karta inaad mutaysatay adeegyada dhaqancelinta xirfadeed oo aad u sii marayso WCB.

Dhaqancelinta xirfadeed waxay kaa caawinaysaa inaad ku laabato shaqada shaqada ixtiraamaysa awoodahaaga shaqo. Tan waxa kujiri kara in lagaa caawiyo helista shaqo kale adiga oo sii maraya adeegyo kala duwan oo ka bilaabma dib-u-shaqaalaysiin ilaa dib-u-tabobarid.

## Waajibyaadyada Dib-u-shaqaalaysiinta

Laga bilaabo Janaayo 1, 2007, sharcigu wuxuu dhigayaa loo-shaqeeyayaasha haysta 25 ama kabadan oo shaqaale wakhti buuxa ama wakhti badhkii caadi ah shaqeeya inuu dib-u-shaqaaleeyo shaqaalaha dhaawacmay ee u shaqaynayey ugu yaraan 12 bilood oo xidhiidh ah kahor dhaawaca. Macluumaad dheeraad ah oo kusaabsna waajibyaadyada dib-u-shaqaalaysiinta booqo **wcb.mb.ca** ama wac **204-954-4321** ama bilaash ku wac **1-855-954-4321** si aad u hesho nuqul warqadda *Waajibaadyada Dib-u-shaqaalaysiinta*.



## **Xafiiska Kucamalfalka Caddaaladda ah**

Xafiiska Kucamalfalka Caddaaladda ah waa xafiis madaxbannaan oo ka shaqeeya xaqiijinta kucamalfal cadaalad ah WCB. Xafiisku wuxuu u dhaqmaa sida xeer-ilaaliye loogu talagalay shaqaalaha dhaawacma, ku-tiirsanayaashoda, iyo loo-shaqeeyayaasha si uu u xalliyo waxyaalaha ay dhici karto inay kaga xidhan yihiin WCB, isagoo sidoo kale ka caawinaya WCB inay horumariso tayadeeda adeegga. Waxa laga wici karaa **204-954-4467** ama bilaash kala hadal **1-855-954-4321**.

## **Nuqulada Faylka Cabashada**

Waad codsan kartaa nuqul kamid ah faylkaaga cabashada kadib marka WCB ay qaadato go'aankeeda hore ee ah inay aqbasho ama diido cabashada. Waydii qofka aad la xidhiidho WCB ama wac Waaxdayada Galaangal u Yeeladka Faylka 204-954-4453. Loo-shaqeeyayaasha iyo u-doodayaashu sidoo kale waxay codsan karaan nuqulo fayl. Marka u horraysa ee nuqulada faylku bilaa lacag yahay.

## **Rafcaanada**

Haddii aad rabto inaad rafcaan ka qaatato go'aan ay ka qaadatay WCB cabashadaada, kala xaajoo go'aanka qofka aad la xidhiidho WCB ugu horraynba. Waxa jira hab rafcaan oo rasmi ah oo laba tallaabo ah oo aad heli karto haddii wali aanad ku qancin go'aanka.

Tallaabada koowaad ee rafcaanku waa Xafiiska Dib-u-eegista. Marka aad dirto foomka *Codsiga Dib-u-eegisa* (oo laga kujira [wcb.mb.ca](http://wcb.mb.ca)) Sarkaal Dib-u-eegiseed ayaa loo xilsaari inuu eego rafcaankaaga.

Haddii aanad wali ku qanacsanayn go'aanka, waxaad u rafcaan qaadan kartaa Guddida Rafcaanka WCB, taasi oo ah heerka u dambeeya ee rafcaanka. Way dhici kartaa inaad rafcaanka ku qaadato qoraal ama adiga oo u taga guddida saddexda guddi ee shaqaalaha matala, loo-shaqeeyayaasha iyo danaha dadwaynaha. Rafcaanada adiga ayaa bilaabi kara ama, haddii aad rabto, wakiilkaaga.

Haddii aad u baahan tahay caawimo rafcaan u qaadashada Xafiiska Dib-u-eegisa ama Guddida Rafcaanka, waxaad la xidhiidhi kartaa Xafiiska La-talinta Shaqaalaha. Xafiiska La-talinta Shaqaalaha sidoo kale wuxuu bixin karaa talo iyo/ama fikrad madaxbanaan oo la xidhiidha arrimaha ama go'aanada WCB.

### **Worker Advisor Office**


(Xafiiska La-talinta Shaqaalaha)

406 – 401 York Avenue

Winnipeg, MB R3C 0P8

Telefon 204-945-5787

Faagis 204-948-2020



# Macluumaad guud oo kusaabsan WCB

- Loo-shaqeeyahaaga ayaa bixinaya dhamaanba xuquuqda caymised WCB – lagama jarayo mushaarkaaga lagamana bixinayo lacagta canshuurta.
- WCB waxaa maamulo Guddi Agaasimayaal oo ka kooban Gudoomiyaha Gudiga dhexdhexaadka ah, seddax wakiil oo shaqaalaha ah, seddaxwakiil oo loo-shaqeeyayaasha ah iyo saddex wakiil oo ka socda danaha dadweynaha.
- WCB waxaa ka go'an inay bixiso adeegyo degdeg ah, fudud, taxadar leh, haboon oo cad.
- Waxaad xaq u leedahay inaad samayso cabashada WCB haddii aad ku dhaawacantay shaqada. Waa sharci darro in loo-shaqeeyo uu ku waydiisto inaad fayl garaysan cabasho.



**Hadii aad shaqada  
ku dhaawacantid waxaan  
halkan u  
joognaa inaan ku caawino.**

## **Sida na Loola soo Xidhiidhi Karo**

Workers Compensation Board of Manitoba  
333 Broadway, Winnipeg, MB R3C 4W3

Iimayl noogu soo dir  
**wcb@wcb.mb.ca**

Wixii macluumaad dheeraad ah, booqo  
**www.wcb.mb.ca**

Ama naga soo wac  
**204-954-4321**

Ama lambarka bilaashka ah  
**1-855-954-4321**

### **Tabi khayaanada iyo sharci jabinta**

Wac 204-888-8081, ama lambarka lacag  
la'aanta ah, 1-844-888-8081

Iimaylka **Compliance@wcb.mb.ca**

Shaqo BADQABTA waa masuuliyadda qof kasta.  
Kahortagga dhaawacyadu wuxuu u fiican yahay  
loo-shaqeeyayaasha iyo shaqaalahaba. Si aad wax  
dheeraad ah u ogaado, booqo:

**safemanitoba.com**

Ama wac 204-957-SAFE (7233) Winnipeg  
Ama 1-855-957-SAFE (7233) dibadda Winnipeg

